



Take action against bullying, harassment,
discrimination and other kinds of violence.



Tilmaanbixinnada loogu talaggalay ardayda
waxbarashada xirfadda iyo dugsiga sare
**Kahortagga qashaqashaadda iyo
xoog-muquuniska galmaada iyo wax
ka qabashadooda**

Jooji qashqashaadda iyo xoogsheegada galmada ah!

Qashqashaadda iyo xoogsheegashada galmadu waxay ka dhici kartaa iyadoo aan bey'ad gaar ah ku xirnayn, tusaale ahaan warbaahinta bulshada, Qashaqashaaddu waxayba ku korortay shabakadda iyo goobaha dadka ka dhexeeya.

Waa maxay waxa laga hadlayo, sidee ayaa qashaqashaadda iyo xoogsheegashada wax looga qaban karaa ammaankana loo kordhin karaa?



FINNISH NATIONAL
AGENCY FOR EDUCATION



MINISTRY OF
EDUCATION AND CULTURE
FINLAND



MINISTRY OF JUSTICE
FINLAND

Qashqashaadda iyo xoogsheegashada galmada ah – maxay yihiin iyagu?

Qashqashaadda galmada ah waxaa loola jeedaa hadal, hadal la'aan, jir ahaan ama habdhaqan kale oo galmo oo aan la doonayn, kaas oo lagula xadgudbayo dhowrsanaanta nafeed ama jireen ee qofka iyadoo si gaar ah loo abuurayo jawi halis, nacayb, sharaf-dil, liidmo ama dhib leh. Xoogsheegada galmada ah wuxuu markasta xadgudbaa dhowrsanaanta ama xuquuqda ismaamul ee qofka.

Qashqashaadda iyo xoogsheegashada galmadu waxay sababaan rafaad banii-aadminimo. Qashqashaadda iyo xoogsheegashadu waxay saameeyaan fahamka uu qofku ka qabo jirkiisa iyo wehelkiisa, xiriirada dadka iyo jinsinnimadiisa. Xoogsheegashada waxaa ka dhasha dhibaatooyin caafimaad, xaalado cabsi ah, dhibaataan ama dirqin.

Xoogsheegashada galmadu waa dembi. Sababtaas darteed, marwalba waa muhiim in arrintaas loo sheego islamarkaasna waxa dhacay lagu wargeliyo shaqaalaha goobta waxbarashada, waalidka iyo booliska.





Qashqashaadda iyo xoogsheegashada galmadu waa tusaale ahaan:

- diritaanka farriimo qoraal ah iyo sawirro ay ku laran yihiiin waxyaabo galmo la xiriira
- faallo ka bixinta sawirada ama qofka
- habdhaqan iyo taabasho jireed oo aanu qofku rabin: salaaxid, tuujin, dhabaan-dhabid, maroojin ama taabasho kale oo la taabto tusaale ahaan xubinta taranka, barida, naasaha ama cajirada
- dalabyo ama shuruudo la xiriira jinsi ama galmo
- ku qasbidda fal galmo ah oo ku xadgudbaya xaqa ismaamul ee qofka
- ku qasbidda daawashada agab galmo ama galmo
- faraxumayn galmo oo loo geysto qof kayar 18 sano iyo ku qalqaalinta falal galmo ah qof kayar 16 sano
- adeeg galmo ka iibsashada qof kayar 18 sano
- kuufsiiga dhaca marka lagu jiro xiriirka wada-socoshada, guurka furan ama guurka
- xoog-sheegasho sharafeed iyo gudniinka qodban ee xubnaha taranka

Sharcigu wuxuu si gaar ah u ilaalinayaa dadka kayar 16 iyo 18 sano

Finland waxaa ka jira labo ilaalinta xadka da'da ah: dadka kayar 16 iyo 18 sano.

Wax galmo ah laguma samayn karo qof kayar 16 sano ama looma galmoon karo. Falalka qashqashaadda galmo waxaa loo turjumaa xoogsheegasho galmo, haddii loo geysto qof kayar 16 sano. Qof kayar 16 sano ma bixin karo oggolaansho rasmi ah oo ku saabsan fal galmo ama wasmo uu la yeesho da'yar isaga isaga si muuqata uga weyn ama qof qaangaar ah.

Ilaalinta xadka da'da ku salaysan ee 18 sano jiryadu wuxuu da'yarka ka ilaalinayaa faraxumaynta galmo ee ka dhacda qoyska gudihiisa, qof la aaminay ama qof leh awood talisa.

Haysashada iyo qaybinta agabka galmo la xiriira oo muujinaya qof 18 sano kayar waa mid markasta mamnuuc ah.

Macluumnaad dheeraad ah: <https://poliisi.fi/seksuaalirikokset>

Sidee ayaan wax u samaynayaa haddii aan la kulmo qashqashaad iyo xoogsheegasho galmo ah?

- dheh maya, qashaqashaadahana ka codso in uu qashaqashaadda joojiyo
- haddii aanay xaaladdu kala caddayn, ka hadal arrinta oo sheeg falalka adiga dhibaya
- xusuusnow, in inkastoo aadan awoodin in aad hadasho ama wax samayso marka aad xaalad adag ku jirtyo, mas'uuliyadda qashqashaadda iyo xoogsheegashadu waxay marwalba saarantahay qofka sameeyay
- haddii loo baahdo ka tag meesh oo aad dadka aad u aragto in ay ammaan yihiiin
- sawirro ka reebu xiriirada aad u aragto in ay xun yihiiin ee internetka dhexdiisa laguugula yeesho
- baro codsashada caawimaadda, sida sawirrada loo reebu iyo ka hadlidda qashaqashaadda
- u sheeg waalidkaa wixi dhacay
- U sheeg kalkaalisada caafimaadka, cilmu-nafsiyaqaanka, sooshalka dugsiga ama macallinka.
Shaqaalahaa goobta waxbarashada waxaa saaran waajibka ku wargelinta badbaadada carruurta iyo booliska falalka nafta iyo caafimaadka ka dhanka ah ee ay ogaadeen.
- ka codso haddii loo baahdo caawimaad
thl.fi/seri
riku.fi
nuortenexit.fi
- haddii aad aragto qashaqashaad ama xoogsheegasho galmo, codso caawimaad. Xusuusnow ammaankaada iyo kan dadka kale xaqijina, in qofka falka loo geystay uu helo taageero iyo caawimaad.
- wargelin ka samee qashqashaadda ama xoogsheegashada galmo ee goobta waxbarashada kugula dhaca.
- markasta xoogsheegashada ka samee wargelinta dembiga ee booliska

Qofka lala xiriiri karo, machadka ayaa buuxinaya



Haddii aan anigu ahay qofka falka sameeyay, maxaan sameeyaa?

- kahadal arrinta caawimaad raadso [naisenvakivalta.fi, miessakit.fi](http://naisenvakivalta.fi/miessakit.fi)
- waxaad sidoo kale caawimaad ka raadsataa kalkaalisada caafimaadka ee machadka, cilmu- nafsiyaqaanka iyo sooshalka dugsiga

Sidee ayaan saamayn ugu yeelan karaa ammaanka?

- kahortagga qashqashaadda iyo xoogsheegashadu waa qayb kamid ah horumarinta sinnaanta, bey'ad waxbarasho oo ammaan ah iyo waxqabad dhaqameedka wanaagsan
- ka feker, sida aad adigu ugu dhaqanto shabakadda iyo sida aad dadka kale uga hadasho
- ka feker, sida aad naftaada iyo dadka kale ugu samayn karto goob ammaan ah
- si firfircoonaan ah qayb uga noqo horumarinta ammaaka iyo waxqabad dhaqameedka dadka oo dhan si munaasab ah fiiro loogu yeelanayo

Sidee ayaan isaga badbaadin karaa qashqashaadda iyo xoogsheegashada galmaada ah?

- xusuusnow, in xiriirka galmo ee caadiga ah ay markasta la xiriiraan rabitaan iyo oggolaansho labada dhinaca ah
- xusuusnow, in aad xaq u leedahay xadkaada iyo in xaalad kasta oo lagu jiro aad diidi karto dhammaan wixi aadan doonayn
- xusuusnow sidoo kale, in qashqashaadda iyo xoogsheegashada galmadu aanay marnaba ahayn sabab dhibanaha ka timid, iyo in falalka kor lagu soo sheegay aanan markasta laga gaashaaman karin
- baro in aad ku shaqayso xiririirada u muuqda kuwa aan fiicnayn ee ka dhaca internetka, goobaha dadka ka dhexeeya ama machadka waxbarashada
- ka feker, janaalada ay tahay in aad internetka ka gasho. Ku wargeli qofka janaalka maamulka waxyabaha qashqashaadda ah ama aan munaasabka ahayn ee meesha ku jira.
- si taxaddar ah uga firso, waxyabaha adiga ama dadka kale ku saabsan ee aad internetka ku qaybinayso
- kula soco ehelkaada ama dadka kale ee aad u ragto in ay ammaan yihiin goobaha ammaanka ah habeenki iyo maalinti



Take action against bullying, harassment, discrimination and other kinds of violence.

Buug-yarahan wuxuu qayb ka yahay agabka Maamulka waxbarashada ee kahortagga dhibista, qashqashaadda iyo xoog-muquunis. Shaqada bogga internetku waxay ku salaysantahay barnaamijka waxqabad ee kahortagga dhibista, xoog-muquuniska iyo qashqashaadda ee wasaaradda waxbarashada iyo dhaqanka

<https://okm.fi/kiusaamisen-ehkaisemisohjelma>
iyo waxqabadka istaraatijiyadda carruurta ee qaranka
<https://julkaisut.valtioneuvosto.fi/handle/10024/163541>.

Waxaa kale oo uu buug-yarahan qayb ka yahay barnaamijka kahortagga xoog-muquuniska dumarka ka dhanka ah ee wasaaradda caddaaladda <https://oikeusministerio.fi/naisiin-kohdistuvan-vakivallan-torjuntaohjelma>



FINNISH NATIONAL
AGENCY FOR EDUCATION



MINISTRY OF
EDUCATION AND CULTURE
FINLAND



MINISTRY OF JUSTICE
FINLAND